



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA



Summad: MDWAD/936/2022

TR. 13/09/2022

UJEEDO:-SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, QIIMEYN HANTI, QEYBIN, IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 13/09/2022, Waxa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-Axmed Maxamuud Guuleed, Somali ah, Dhashay Sanadkii 1962, Ina Faadumo Aadan, sita S/ Passport No. P01193562.

2-Daahir Cali Maxamuud, Somali ah, Ku Dhashay Howlwadaag, Sanadkii 1966, sita Norwegian Passport No. 30102501.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum **Macallin Xuseen Faarax**, kuna geeriyooday Muqdisho, 1978, labadiisa waalidna way ka geeri horeeyeen, wuxuuna ifka uga tagay oo dhaxlaya Xaas 4 wiil iyo 6 Gabdhood Waxayna kala yihiin sidan soo socota: -

DADKA:-

1-Maxmed	Mac Xuseen	Faarax	Marxuum		(Wiilka Marxuumka)
2-Sahro	Mac Xuseen	Faarax	Marxuumad		(Gabadhii Marxuumka)
3-Qaali	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1954	(Gabadhii Marxuumka)
4-Dhooyo	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhashay 1966	(Gabadhii Marxuumka)
5-Cali	Mac Xuseen	Faarax	Degan Italy	Dhashay 1966	(Wiilkii Marxuumka)
6-Shariifo	Mac Xuseen	Faarax	Degan Norway	Dhalatay 1966	(Gabadhii Marxuumka)
7-Mulki	Mac Xuseen	Faarax	Degan Norway	Dhalatay 1968	(Gabadhii Marxuumka)
8-Ruqiyo	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1974	(Gabadhii Marxuumka)
9-M/ud	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhashay 1970	(Wiilkii Marxuumka)
10-C/wahaab	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1974	(Wiilkii Marxuumka)
11-Xaawo	Maxamuud	Kheyre	Marxuumad		(Xaaskii Marxuumka)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyooday **Marxuum Maxamed Mac Xuseen Faarax**, Kuna Geeriyooday Qoryooley, Sanakii 1997, labadiisa waalidna wey ka geeri horeeyeen, wuxuuna ifka uga tagay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban: Xaas, 3 Gabdhood iyo 2 Wiil Waxayna Kala Yihiin:-

1-Deeqo	Maxamed	Mac Xuseen	Degan USA	Dhalatay 1981	(Gabadhii Marxuumka)
2-Sacdiyo	Maxamed	Mac Xuseen	Degan Muqdisho	Dhalatay 1984	(Gabadhii Marxuumka)
3-Cadar	Maxamed	Mac Xuseen	Degan Muqdisho	Dhalatay 1983	(Gabadhii Marxuumka)
4-Cismaan	Maxamed	Mac Xuseen	Degan South sudan	Dhashay 1987	(Wiilkii Marxuumka)
5-C/qaadir	Maxamed	Mac Xuseen	Degan Muqdisho	Dhashay 1988	(wiilkii Marxuumka)
6-Xaawo	Maxamed	Caroone	Marxuumad		(Xaaskii Marxuumka)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay **Marxumad Sahro Mac Xuseen Faarax**, Kuna Geeriyooday Muqdisho, Sanakii 2018, labadeeda waalidna wey ka geeri horeeyeen, seyna ma malaheyn, waxeyna ifka uga tagtay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban: 4 Gabdhood iyo 3 Wiil Waxayna Kala Yihiin:-

1-Maxamed	Cabdi	Barre	Degan Muqdisho	Dhalatay 1965	(Wiilkii Marxuumada)
2-Fowsiyo	Cali	Cabdi	Degan Muqdisho	Dhalatay 1970	(Gabadhii Marxuumada)
3-Sucaad	Cali	Cabdi	Degan Muqdisho	Dhalatay 1984	(Gabadhii Marxuumada)
4-Shukri	Cali	Cabdi	Degan Qaahira	Dhalatay 1976	(Gabadhii Marxumada)
5-Wiilo	Cali	Cabdi	Degan New Delhi	Dhalatay 1980	(Gabadhii Marxuumada)
6-Maxamed	Cali	Cabdi	Degan Muqdisho	Dhashay 1984	(Gabadhii Marxuumada)
7-Axmednuur	Cali	Cabdi	Degan Muqdisho	Dhalatay 1993	(Gabadhii Marxuumada)

PAGE 1/3

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay **Marxumad Xaawo Maxamuud Khayre**, Kuna Geeriyootay Muqdisho, Sanakii 1996 labadeeda waalidna wey ka geeri horeeyeen, seyna malaheyn, waxeyna Ifka uga tagay oo Dhaxlaha Dhaxaltooyo Ka Kooban: 4 Gabdhoo iyo 2 Wiil Waxayna Kala Yihiin:-

6-Shariifo	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1966	(Gabadhii Marxuumada)
7-Mulki	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1968	(Gabadhii Marxuumada)
8-Ruqiyo	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1974	(Gabadhii Marxuumada)
9-M/ud	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1993	(Wiilkii Marxuumada)
10-C/wahaab	Mac Xuseen	Faarax	Degan Muqdisho	Dhalatay 1974	(Wiilkii Marxuumada)
11-Faadumo	Sahal	Xayle	Degan Muqdisho	Dhalatay 1953	(Gabadhii Marxuumada)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay **Marxumad Xaawo Maxamed Caroole**, Kuna Geeriyootay Muqdisho, Sanakii 2015 labadeeda waalidna wey ka geeri horeeyeen, seyna malahayn, waxeyna Ifka uga tagay oo Dhaxlaha Dhaxaltooyo Ka Kooban: Gabar iyo 2 Wiil Waxayna Kala Yihiin:-

3-Cadar	Maxamed	MacXuseen	Degan Muqdisho	Dhalatay 1983	(Gabadhii Marxuumada)
4-Cismaan	Maxamed	MacXuseen	Degan South sudan	Dhalatay 1986	(wiilkii Marxuumada)
5-C/qaadir	Maxamed	MacXuseen	Degan Muqdisho	Dhalatay 1988	(Wiilkii Marxuumad)

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in MARXUUM **MACALLIN XUSEEN FAARAX**, uu ifka uga tagay Guri ku yaalo Muqdisho, Degmada **Wardhiigleey**, Cabirkiisuna yahay **13.50X13.50-M**, Lotto No. **70**, Lehna Rasiid No. 718554, Tr. 26/11/83, iyo Sabarlog No. 64/2/83, Tr.26/11/1983, D/Hoose ee Muqdisho.

QIIMEYN HANTI IYO QEYBIN DHAXAL

Waxay Markhaatiyaasha Maxkamadda Horteeda ka caddeeyeen in Marxuumka guriga uu ka tagay lagu qiimeeyay lacag dhan **\$106,710.00**, Intaas kadib dhaxaltooyada waxay ku heshiiyeen in ay qeebsadaan Lacag ahaan Si waafaqsan sharciga islaamka intaas kadib Dhaxaltooyada waxay utageen Sheekh si uu ugu qeebiyo Lacagta sida ku cad Warqada ku lifaaqan Dhaxalkoobkan, isla markaana Guriga ay ku wareejiyaan **Maxamud M.Xuseen Faarax** iyo **C/wahaab M. Xuseen Faarax**, Halka Dhaxaltooyada inteeda kale ay u celiyaan qof kasta Qismigiisa Dhaxal waxayna ukala heleen sida soo socota:-

- 1- Shariifo M. Xuseen , Mulki M. Xuseen iyo Ruqiyo M. Xuseen Midkiiba waxay leedahay **\$8,336.71**
- 2- Cali M. Xuseen Wuxuu leeyahay lacag dhan **\$13,346.75** oo uu ka helay Aabihii marxuum M. Xuseen Faarax
- 3- Qaali M. Xuseen Iyo Dhoofa M. Xuseen oo ah Ilmo M. Xuseen midkiiba waxay leedahay Lacag dhan **\$6,669.37** oo ay aabaheed M. Xuseen Ka heshay.
- 4- Cadar Maxamed M. Xuseen Waxay leedahay lacag dhan **\$2,000.81** oo ay ka heshay Aabaheed Maxamed M. Xuseen iyo Hooyadii Xaawo Maxamed Carone.
- 5- Cabdulqaadir Maxamed M. Xuseen iyo Cusmaan Maxamed M. Xuseen waxuu Midkiiba Leeyahay lacag Dhan **\$4,001.62** oo ay ka heleen Aabahood Maxamed M. Xuseen iyo Hooyadii Xaawo Maxamed Caroone.
- 6- Deeqo Maxamed M. Xuseen iyo Sacdiyo Maxamed M. Xuseen waxay midkiiba leedahay Lacag Dhan **\$1,667.34** oo ay ka haleen Aabahood Maxamed Macallin Xuseen.
- 7- Maxamed Cali Cabdi, Axmed Nuur Cali Cabdi iyo Maxamed Cabdi Barre Midkiiba wuxuu leeyahay Lacag dhan **\$1,333.87** oo ay ka heleen Hooyadood Sahro M. Xuseen.
- 8- Faadumo Sahal Xayle Waxay leedahay Lacag Dhan **\$1,667.34** oo ay ka heshay Hooyadeed Xaawo Maxamuud Kheyre.
- 9- Fowziyo Cali Cabdi, Sucaad Cali Cabdi, Shukri Cali Cabdi iyo Wiilo Cali Cabdi waxay midkiiba leeyihiin lacag dhan **\$666.93** oo ay ka heleen Hooyadood Xaawo Maxamuud Kheyre.

WAKAALADO.

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah: 1- Cadar M/ed M. Xuseen 2- M/ud M. Xuseen Faarax 3- Faadumo Sahal Xayle 4- Axmednuur Cali Cabdi, ay maxkamada horteeda ku wakiisheen Ruqiyo M. Xuseen Faarax iyo Sucaado Cali Cabdi, sidoo kalana Dhaxaltooyada inteeda, Waxay Soo Wakiisheen **Ruqiyo M. Xuseen Faarax, Sucaado Cali Cabdi** iyo **C/qaadir M/ed Xuseen** Sida Ku Cad 1- Wakaalad Gaar ah Rep No: 82815/MPN/2022, Tr: 24-08-2022 2- wakaalad Gaar ah Rep No: 82765/MPN/2022, Tr: 20-08-2022, kana soo wada baxeen Nootaayo Muqdisho, uuna wada saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble, 3- Wakaalad Gaar ah Rep No.23163/22 Tr. 18/08/2022, 4- Wakaalad Gaar ah Rep No. 23092, Tr. 24-07-2022, kana soo wada baxeen Nootaayo Dayax Laanta Nairobi, uuna saxiixy Dr. Aden Jum'ale Mohamed 5-Wakaalad Gaar ah NBDUKB3/2323/2022, Tr. 03/08/2022,

PAGE 2/3



6- Wakaalad Gaar ah NBDUKB3/2350/2022, Tr.12/08/2022, kana soo wada baxday Nootaayo Banaadir Danuun, uuna saxiixay Dr.Yoonis C/raxmaan Maxamuud (Timacadde), 7- Wakaalad Gaar ah Ref BB8/2,877/2022, Tr. 25/07/2022, kana soo baxday Nootaayo Banaadir Tima Cadde, uuna saxiixay Dr. C/raxmaan Maxamuud Cali (Timacadde), 8- wakaalad Guud kuna taariikhaysan 6/08/2022, kana soo baxday Nootaayo Ojay Hassan Dubow, 9- wakaalad Gaar ah Ref No. ESR/1/1322/2022, Tr. 25/08/2022, kana soo baxday Safaarada J.F.S ee Hindiya – New Delhi 10- Wakaalad Gaar ah Ref: SEJ: 732/22, Tr.02/08/2022, kana soo baxday safaarada J.F.S ee Juba –South Sudan, uuna saxiixay la taliyaha kowaad ee safaarada Soomaaliya ee koonfurta Suudan Maxamed Cabdi Cali, 11- wakaalad Gaar ah Ref No. 03/55/1312/22, Tr. 16/08/2022, safaaradda J.F.S ee Qaahira, uuna saxiixay Qunsulka Safaarada Ismaaciil Cabdi Xuseen, ayana soo wada xaqiijisay wasaarada Arrimaha Dibada J.F.S. iyo Maxkamada Racfaaanka Gobolka Banaadir, una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karaan, dhaxalkoob u samayn karaan, xafidi karaan, gadi karaan, Hibeyn karaan, Wareejin karaan, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin karaan, dhisi karaan, kireyn karaan, ka saari karaan, Saxiixi karaan kaalintooda, una doodi karaan una dacwoon karaan oo qareen u qaban karaan, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karaan qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Marxuumiinta sare ku xusan.

DAMIINU MAAL

- **Axmed Maxamuud Guuleed & Daahir Cali Maxamuud**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada iyo Wakaaladaha Sare Ku Xusan.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- AXMED MAXAMUUD GUULEED

2- DAAHIR CALI MAXAMUUD

=SAXIIXA DHAXALTOOYADA KU SUGAN MUQDISHO=

1-CADAR M/ED MAC XUSEEN

2-AXMEDNUUR CALI CABDI

3- M/UD MAC XUSEEN FAARAX

4-FAADUMO SAHAL XAYLE

=SAXIIXA WAKIILADA QEYB KA MID AH DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALTOOYADA=

1- RUQIYO MAC XUSEEN FAARAX

2- SUCAAD CALI CABDI

3- C/QAADIR MAXAMED XUSEEN

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay Dukumintiga Dhulka ee uu marxuumka ku qoran yahay, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida Marxuumiinta kala ah **1-Marxuum Macallin Xuseen Faarax 2-Marxuum Maxamed Macallin Xuseen 3- Marxuumad Sahro Macallin Xuseen, 4- Maxuumad Xaawo Maxamuud Kheyre, 5- Marxuumad Xaawo Maxamed Caroole** oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Caddeyn Tariko, iyo Wakaalado ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali



PAGE 3/3

304566



575204



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	MOHAMOUD MOALIM HUSSEIN
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	25-Apr-1970
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	304566
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Hodan
MAGACA HOoyADA Mother's full Name	HAAWO MOHAMOUD KHEYRA
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	28-Aug-2023
SHAQADA Occupation	MERCHANT



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed



(Handwritten signature of Cumar Maxamuud Maxamed)





575202



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:
(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	CADAR MOHAMED MOALIM
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	25-Apr-1983
GOOFTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	304567
JINSI Gender	Female
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Hodan
MAGACA HOOYADA Mother's full Name	HAAWO MOHAMED CARGONE
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	28-Aug-2022
SHAQADA Occupation	MERCHANT



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Cumar Maxamuud Maxamed

(Handwritten signature of Cumar Maxamuud Maxamed)



